Casharka 42

1. Inkastoo sannado badan ay ka soo wareegatay markii Ilaah ballanqaaday Badbaadiyaha, miyaa Ilaah iloobay Ballankiisa?
-Maya.

2. Yuu Ilaah farriimaha khuseeya imaanshaha Badbaadiyaha u soo dhiibay?
-Nebiyada.

3. Halkee baa lagu qoray farriimaha khuseeya imaanshaha Badbaadiyaha ee Ilaah u soo dhiibay nebiyada?
-Waxaa lagu qoray kitaabka Ilaah ee Baybalka.

4. Miyaa badanaa reer binu Israa'iil ay dhegaystaan nebiyada Ilaah?
-Maya.

5. Maxaa reer binu Israa'iil ku sameeyeen nebiyadii Ilaah?
-Way laayeen.

6. Intii ay maqli lahaayeen nebiyada Ilaah, yey maqlayeen ama dhegaysanayeen reer binu Israa'iil?
-Nebiyada beent aah.

7. Nebiyada beenta ah waxay ku doodi jireen inay runta Ilaah sheegayaan, laakiin maxay xaqiiqo ahaan dadka u sheegi jireen?
-Beenta Shayddaanka.

8. Miyaa Ilaah aqbalay caabudista reer binu Israa'iil ay caabudi jireen asnaamta ay iyagu samaysteen, iyo inay weliba Ilaah ku caabudaan Macbudka?



-Maya.

9. Maxaa sabab u ah?
-Waayo Ilaah wuxuu garanayaa inay xagga afka un Ilaah ka caabudayeen.
-Waayo Ilaah wuxuu garanayaa oo kale inay qalbiga ka caabudayeen asnaamta.

10. Yaa garanaya wax kasta ee ku jira quluubtayada?
-Ilaah.

11. Maxaa Ilaah ka leeyahay qalbiyadeenna?
-Ilaah wuxuu ka leeyahay waxaa albiyadeenna oo dhan ka buuxa dembi.

12. Inkastoo badanaa reer binu Israa'iil ay caabudayeen asnaamta, miyuu jiraa qof reer binu Israa'il ah oo Ilaah oo keliya caabudi jiray?
-Haa, balse way yaraayeen.

13. Yey sugayeen reer binu Israa'iil kuwaasoo caabudayey Ilaah?
-Waxay dhowrayeen Ilaah inuu soo diro Badbaadiyaha.

-Ilaah waa samir badan yahay.
-Ilaah wuxuu dhowryaa in dadku ay isaga u soo leexdaan oo ka weecdaan dariiqa dembiga iyo inay soo raacaan dariiqiisa.

-Ilaah wuxuu dhowrayey 120 sannadood in wakhtigii nebi Nuux noolaa ay ka soo lexdaan driiqa dembiga, oo ay tubtiisa u soo leexdaan.

-Ilaah wuxuu kaloo dhowrayey 200 oo sannadood in reer binu

Israa'iil ka soo leexdaan dariiqa dembiga oo ay qaadaan dariiqa Ilaah.

-Balse reer binu Israa'iil kama ayan weecan tubtii dembiga.

-Reer binu Israa'iil waxay la ahayd in Ilaah illoobayo dembigooda.

-Miyaa haddaba Ilaah iloobay dembigooda?
-Maya.

-Reer binu Israa'iil waxay la ahayd in Ilaah aanu iyaga u ciqaabaynin dembigooda.

-Miyaanu Ilaah u iqaabin dembiyadooda?
-Haa.
-Isla sida Ilaah u cqiaabay dembiyada dadkii noolaa wakhtigii Nuux, ayaa Ilaah reer binu Israa'iil ugu ciqaabay dembiyadooda.

-Sidee baa Ilaah u ciqaabay tobankii qabiil ee Israa'iil?

-Ilaah wuxuu iyaga u soo diray reer Ashuur si ay u qabsadaan tobanka qabiil ee reer binu Israa'iil, si ay iyaga addoomo uga dhigtaan.

Bal aynu akhrinno Boqorradii labaad 17:5-8

5-Markaasaa boqorkii Ahsuur dalkii oodhan dhex maray, oo wuxuu yimid Samaariya, oointii saddex sannadood ah ayuu hareereeyey.
6-Oo Hoosheeca sanaddiisii sagaalaad ayaa boqorkii Ashuur qabsaday Samaariya, oo dadkii Israa'iilna buu u kaxaystay Ashuur, oo wuxuu dejiyey Xalax, iyo Xaaboor oo webigii



Goosaan ag ahaa, iyo magaalooyinkii reer Maaday.
7-Oo taasu way dhacday, maxaa yeelay, dadkii Israa'iil waxay ku dembaabi jireen Rabbiga Ilaahooda ah oo iyaga ka soo bixiyey dalkii Masar oo ka soo hoos bixiyey gacantii Fircoon oo ahaa boqorkii Masar, oo waxay ka cabsan jireen Ilaahyo kale,
8-Wayna ku socon jireen qaynuunnadii quruumaha kale, kuwaasoo Rabbigu ka eryay dadka Israa'iil hortooda, iyo kuwii ay boqorradii dadkii Israa'iil samaysteenba.

-Reer Ashuur waxay qabsadeen tobankii qabiil ee reer binu Israa'iil, waxaanay u kaxaysteen Ashuur si ay addoommo uga dhigtaan.

-Reer Ashuur waxay ka keeneen quruumo badan dalal kale oo dunida ah si ay ugu noolaadaan dhulkii ay ka kaxeeyeen reer binu Israa'iilkii degganaa daafaha woqooyi oo la oran jiray, waana tobanka qabiil.

-Dadkii halkaas la keenay maahayn kuwo rumaysan Ilaah, oo waxay caabudi jireen asnaam ay iyagu samaysteen.

-Dadkaasuna waxay is-guursadeen qaar ka mid ahaa kuwii dalka looga tegay, waxaana halkaas ka soo baxay dad cusub.

-Waxaa ddkaas iyaga ah loogu yeeri jiray reer Samaariya.

-Reer Samaariya hab iyagu ay samaysteen ayey Ilaah ku caabudi jireen, mana ahayn dariia Ilaah.

-Kaddib markii Ilaah ciqaabay tobanka qabiil ee Israa'iil, sidee buu
-Ilaah u ciqaabay labadii qabiil ee degganaa koofurta oo ama deegaanka Yahuudiya?

-Ilaah wuxuu iyaga u soo diray reer Baabuloon si loo qabsado labadan qabiil ee reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin, oo waxaa iyagu ay noqdeen addoommadii reer Baabuloon.

Bal aan idiin akhriyo Boqorradii labaad 25:1-7

1-Oo sannaddii sagaalaad oo boqornimadiisa bishii tobnaad maalinteedii tobnaad ayaa Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon iyo ciidankiisii Yeruusaalem ku kaceen, oo intay hor degeen ayay qalcado hareereheeda ka dhisteen.

2-Oo sidaasay magaaladii u hareeraysnayd tan iyo sannaddii kow iyo tobnaad oo Boqor Sidqiyaah.

3-Oo maalintii sagaalaad oo bishii afraad ayaa abaartii magaaladii aad iyo aad ugu xumaatay, oos idaas daraaddeed dadkiid alkii degganaa cunto ma haysan.

4-Markaasaa meel magaalada ahayd la jebiyey, oo raggii dagaalka oo dhammu intay habeennimo carareen ayay mareen jidkii iirddii u dhaxaysay labada derbi oo ku ag tiil beertii boqorka; oo boqorkiina wuxuu maray jidkii Caraabaah. Haddaba reer Kaladayiin waxay ku wareegsanaayeen magaalada.

5-Laakiinse ciidankii reer Kaldiyiin ayaa boqorkii eryaday, oo waxay ku gaadheen bannaannadii Yerixoo, oo ciidankiisii oodhammuna way ka kala firdheen.

6-Oo markaasay boqorkii qabsadeen ooboqorkii Baabuloon ugu geeyeen Riblaah, wayna xukumeen.

7-Oo Sidqiyaah wiilashiisiina hortiisay ku laayeen, dabadeedna Sidqiyaah indhihii bay ka soo bixiyeen, silsiladona bay ku xidheen, oo waxay ku kaxeeyeen Baabuloon.

-Marka ay sidan tahay reer Baabuloon waxay qabsadeen labadii qabiil ee degganaa Yahuudiya, oo badankoodna waxay u wateen Baabuloon si ay addoommo uga dhigtaan.



-Reer Baabuloon waxay kaloo burburiyeen caasimadda Yeruusaalem.

Bal aynu akhrinno Boqorrada Labaad 25:9-12 & 21

9-Markaasuu gubay gurigii Rabbiga iyo gurigii boqorka; oo wuxuu kaloo gubay guryihii Yeruusaalem oodhan, kuwaasoo ahaa guri kasta oo weyn.

10-Markaasaa ciidankii reer kaldayiin ood han oo la socday sirkaalkii askarta waxay wada dumiyeen derbiyadii Yeruusaalem ku wareegsanaa.

11-Oo Nebuusaradaan wuxuu maxaabiis ahaan u kaxaystay dadkii magaalada ku hadhay, iyo kuwii cararay oo u galay boqorkii Baabuloon, iyo intii dadkii faraha badnaa ka hadhay.

12-Laakiinse sirkaalkii askartu wuxuu ka tegey dadkii waddanka ugu liitay inay ahaadaan kuwa canabka iyo beeraha kale ka shaqeeya.

21-Markaasaa boqorkii Baabuloon iyagii ku laayay Riblaah oo ku taal dalka Xamaat. Oo sidaasaa dadkii Yahuudh dalkoodii looga kaxaystay iyagoo maxaabiis ah.

-Sidee baa haddaba reer Baabuloon u dumiyeen Yeruusaalem?

-Waxay markii hore dab-qabadsiiyeen macbudka.

-Waxay kaloo gubeen magaalada inteedii kale ood han.
Waxay kaloo dudumiyeen derbiyadii magaalada ku wareegsanaa.

-Ilaah wuxuu kaloo ciqaab dusha ka saaray tobankii qabiil ee reer binu Israa'iil iyo labadii qabiil ee koofurta degganaa waayo waxay diideen inay ka soo noqdaan dariiqa dembiga.

-Kaddib sannado badan, dadkii reer Yahuudah, ee musaafuriska ugu noolaa dhulkii Baabuloon ayaa Ilaah ku hor ooyey.

-Waxay ku hor cabaadeen Ilaah, oo waxay Isaga u qirteen dembiyadooda, oo waxay weyddiisteen inuu saamoxo iyaga.

-Maaddaama Ilaah naxariis badan yahay, ayaa Ilaah raalli ka noqday in kuwo badan ay magaalada Yeruusaalem ku noqdaan.

-Maxay haddaba dadkii reer Yahuudah sameeyeen markii ay dib ugu noqdeen Yeruusaalem?

-Waxay dib u dhiseen macbudka.
-Waxay kaloo dib u dhiseen magaalada.

-Waxay kaloo dib u habeeyeen derbiyadii caasimadda Yeruusaalem ku wareegsanaa.

-Dadkii reer Yahuudah oo ku soo laabtay Yeruusaalem ayaa loogu yeeray magac kale oo aan ahayn kii hore.

-Magaca cusubna wuxuu ahaa Yuhuud.

-Inkastoo Yuhuuddu ay caabudi jirtay Ilaah, waxay kaloo weli caabudayeen asnaamta ay gacmahooda ku samaystaan.

-Marka ay sidaas tahayna, Ilaah laba qoomiyadood oo kale ayuu u soo diray iyaga inay qabsadaan.

-Markii kowaad, Ilaah wuxuu u soo diray Giriigta si ay u qabsadaan Yuhuudda.



-Giriigtu waxay ka adkaadeen Yuhuudda, oo waxay qabsa-deen dhulkoodii.

-Giriigta waxay bareen Yuhuudda luuqaddooda.

-Kaddib markii Yuhuuddu ay ka bexeen dhulka, Ilaah wuxuu soo diray reer Rooma inay qabsadaan Yuhuudda.

-Reer Rooma waxay ka adkaadeen Yuhuudda, oo waxay qabsadeen dhulkoodii.

-Reer Rooma waxay kaloo Yuhuudda ku khasbeen inay cashuur bixiyaan.

-Reer Rooma waxay xasuuqeen ama qodbeen yuhud badan iyagoo qori ka soo laad-laadinaya, oo musbaar kula qod-baya.

-Magaca boqorka reer Roomana waxaa la oran jiray Kaysar.
-Kaysar wuxuu ku noolaan jiray magaalada Rooma.

-Reer Roomana waxay caabudi jireen asnaam fara badan.

-Oo weliba reer Rooma waxay caabudi jireen boqorkooda la oran jiray Kaysar.

-Haddaba marka uu isagu ku noolaa Yeruusaalem wakhtigaas ayaa waxaa jiray saddex firqo-diimeed oo ka mid ahaa madaxda Yuhuudda.

-Waxay kala ahaayeen, culimada, Farrisiinta, iyo Sadukiinta.

-Qaar ka mid ah Yuhuudda waxaa loogu yeeri jiray culimada.

-Haddaba maxay ahaayeen culimadu?
-Culimadu waxay ahaayeen kuwii qori jiray Hadallada Ilaah.

-Wakhti hore, ma jiri jirin buugaag fara badan sida maanta oo kale.

-Markii dadka ay doonayaan inay wax qoraan, waxay wax ku qori jireen warqad aad u dheer oo duuduuban, oo waxay buuxin jireen daraf ilaa dafarta kale.

-Muuse wuxuu isaguna wuxuu ku qoray Hadallada Ilaah waraaq dheer oo duuduuban daraf ilaa darafteeda kale.

-Maaddaama dad badan ay doonayeen haddaba inay bartaan Hadallada Ilaah, ayaa waxaa khasab noqday in Hadallada Ilaah waraaqo kala go'goan oo badan lagu qoro.

-Marka ay sidaas tahay, culimadu mar waliba wax bay qori jireen. Waxaanay ka min-guurin jireen hadalka waraaqihii duudduubnaa ee hore loogu qoray.

-Maaddaama culimada ay had iyo goorba qori jireen Hadallada Ilaah, waxay ahaayeen dad madax taag badan oo ay la tahay inay dadka kale ka sarreeyaan.

-Maaddaama culimada ay qori jireen Hadallada Ilaah waxay la ahayd inay kaga horreeyaan fahamka Hallada Ilaah dadka kale oo dhan.

-Miyaa haddaba qoritaanka Hadallada Ilaah kaa dhigayaa inaad faham ahaan kaga horrayso dadka kale oo dhan?
-Maya.



-Maaddaama culimada ay mar waliba qorayeen Hadallada Ilaa, ayey iyaga la ahayd inaanay wax dembi ah samaynin.

-Miyaa haddaba qoritaanka Hadallada Ilaah kaa dhigi karaa sida inaadan dembi lahayn?
-Maya.

-Badanaa culimada ma ayan rumaysnayn Hadallada Ilaah.

-Koox ka mid ah hoggaamiyayaasha dadka Yuhuudda ah ayaa la oran jiray Farrisiin.

-Yey ahaayeen Farrisiintu?

-Farrisiintu waxay ahaayeen madaxda Yuhuudda ee dadka bari jiray Hadallada Ilaah.

-Farrisiinta waxay Yuhuudda bari jireen xeerarka.

-Farrisiinta waxay rumaysnaayeen oo addeeceen sharciyada Ilaah oo dhan.

-Haddaba miyaa qofi addeeci karaa ama wada yeeli karaa sharciyada Ilaah oodhan?
-Maya.

-Maaddaama Farrisiinta ay had iyo jeer dadka bari jireen Hadallada Ilaah, waxay iyana noqdeen kuwa qab weyn.

-Maaddaama Farrisiintu mar waliba ay dadka bari jireen Hadallada Ilaah, waxay iyana rumaysnaayeen inay wada fahmayaan erayada Ilaah oodhan.

-Miyaa haddaba barashada Hadallada Ilaah kaa dhigi kartaa inaad fahamto iyaga oo dhan?
-Maya.

-Maaddaama Farrisiintu ay dadka mar aliba bari jireen Hadallada Ilaah, waxay rumaysnaayeen inaanay dembi lahayn.

-Miyaa haddaba barashada Hadallada Ilaah kaa yeeli kartaa inaad dembi la'aan noqoto?
-Maya.

-Badanaa Farrisiintu ma ayan rumaysnayn Ilaah.

-Koox kale oo ka mid ah Yuhuudda ayaa waxaa loogu yeeri jiray Sadukiin.

-Qolamay ahaayeen Sodukiintu?

-Sodukiintu waxay ahaayeen hoggaamiyayaasha Yuhuudda, waxaanay ahaayeen dad tujaar ah oo ilaalin jiray macbudka.

-Maaddaama Sadukiintu ay ahaayeen dad xoola leh, oo ilaalin jiray macbudka, iyana way qab weynaayeen.

-Maaddaama Sadukiinta ay lacag badan haysteen, waxay rumaysnaayeen inaanay dembi lahayn.

-Miyaa haddaba inaad lacag badan lahaato kaa dhigi karaysaa mid aan dembi lahayn?
-Maya.

-Badanaa Sadukiinta ma ayan rumaysnayn Ilaah.



-Haddaba wakhtigaas isaga ah, Yuhuudda waxay dhisi jireen guryo ay ku kulmaan marka ay joogaan meel ka baxsan Yeruusaalem.

-Waxaa guryahaas ama aqalladaas ay ku kulmi jireen loogu yeeri jiray Sunagoogo.

-Sunagoogada dhexdeeda, Yuhuuddu way ku shiri jireen ama isku soo urursan jireen oo waxay akhrisan jireen kitaabka, oo waxay ka wada hadli jireen qorniinkii Muuse.

-Yuhuudda waxay Sunagoogu ka dhisi jireen meel waliba oo magaalooyinkooda ah.

-Maalinta ugu dambaysa ee toddobaadka, Yuhuudd waxay iman jireen sunagoogada, oo waxay dhegaysan jireen wadaadada oo akhriyaya qoraalladii Muuse.

-Marar badan, ayey wadaaddadu dadka ugu sharrixi jireen halkaas qoraalladii Muuse.

-Laakiin maaddaama aan la rumaysnayn Ilaah, haddana sharraxaadda qoraalladii Muuse laga bixinayey waxay ahaayeen kuwo khaldan.

-Inkastoo Yuhuudda badankeeda ayan Ilaah rumaysnayn, waxaa haddana jiray kuwo Ilaah rumaysnaa.

-Kuwaasuna waxay sugayeen in Ilaah iyaga u soo diro Badbaadiyaha.